## Tallaalka BCG (Bacille Calmette- Guérin)

Tani waxay cawineysaa iney kaa ilaaliso Tbda. Waxay burineysaa qaabka jeermis TBda markaa cudur danbe ma sababi karo. Waxay jidhka ku dhiirigelisay inuu la dagaalamo jeermiska TBda iyadoo kordhineysa iska-caabinta. Inkastoo BCG kaa ilaaliso TBda hadana qofkasta oo qaata kama ilaaliso.

Intii wax laga bedelay borigaraamka BCG 2005tii. Si joogto ah looma siiyo BCG caruurta dhigata dugsiyada sare ee UK. Waxaa lagu bedelay borigaraam la abaarayo caruurta yaryar iyo dhalinyarada ee khatarta weyn ugu jirta qaaxada (TB).

## Yaa u baahan inuu qaato BCG?

Talobixinta Waaxda Caafimaadku waa:

- Caruurta ka yar 12 bilood ama ku dhashay goobtaas kiisaska badan lagu arkay (sida in ka badan 40 kiis oo TB ah sannadkii 100,000kii qofba) ama waalidkaa ama ayeyo/awoogaa ay ku dhasheen wadan cudurka qaaxadu ku badanyahay.
  *Haddii ilmahaagu ka mid noqdo qaybtaas aynu sheegnay waxa si toos ah kuugu imanaya kalkaaliye caafimaad oo u diyaarinaya BCG. Waa inaad weydiisaa haddaad wax su'aal ah ka qabtid.*
- Caruurta waaweyn ee aan qaadanin CBG waxa loo shaandheyn doonaa sidey khatarta ugu yihiin TBda, markaa sida ugu haboon ayaa loo baadhayaa oo loo talaalayaa. Tilmaamaha khatartu waxay badanaa ka yimaadaan waalidkaa ama ayeyo/awoogaa oo ku dhashay ama ka yimi wadan cudurka qaaxadu ku badanyahay.
  *Haddaad u aragtid iney tallaal la'aantu ilmahaaga khatar ku kordhineyso fadlan weydii kalkaaliyaha caafimaadka ee guriga kuugu yimaada ama dhakhtarkaaga (GB) iney kuu raadiyaan isu-duwaha tallaalka.*

Waxa kaloo jira kooxo kale oo qofqof ahaan khatar aada ugu jira iney qaaxo qaadaan.

- Dadka qaba cudurka qaaxada ee sanbabadaoo xidhiidh dhow lala yeesho, haddaad kooxdaa ka mid tahay waa lagu muujin oo waxaa kula soo xidhiidhaya adeega caafimaadka dadweynaha ee xaafadda.
- Kooxaha xirfadda leh sida kuwa ka shaqeeya daryeelka caafimaadka, dadka waaweyn, xarunta dadka guri la'aanta ah iyo qaxootiga, shaqaalaha shaybaadhka, shaqaalaha xabsiga shaqaalaha xannaanada xoolaha. Haddii aad kooxahaas mid ka mid ah tahay oo aad 35 jir ka yartahay (baadhitaanku wuxuu soo jeediyey in BCG saameyn yar ku yeelanayso dadka ka weyn 35) oo aan hore laguu tallaalin, waa inaad la xidhiidhaa xirfadleyaasha caafimaadka ama shaqaalaha waaxda ee ku taxaluqa BCG.
- Ashkhaasta 16 ka yar ee doonaya iney tagaan wadan ay qaaxadu ku badantay rabana iney dadka ku dhex noolaadaan horena aan tallaal u qaadan waxaad u baahaneysaa BCG, laakiin filimeyno inaad tallalka ka heshid NHSka, Waa iinaad safarkaaga gaar ahaan ugu doonataa BCG. Hoos ka eeg faahfaahinta dheeraadka ah.

## Waxaan rabaa BCG, markaa weli ma heli karaa?

Haddii aanad ka mid ahayn kooxaha liiska ku qoran, lagugulama talinayo BCG kamana heleysid NHSka.

## BCGga safarka

Lagugu lama talinayo BCG inaad u qaadatid tallaalka safarka.

Caruurta ka yar 16 jir ee dooneysa in ka badan saddex bilood iney ku dhex noolaato dadka caadiga ah ee wadan kale oo cudurka qaaxadu ku badan yahay horena aan u qaadanin BCG waxa lagula talinayaa iney baadhista jidhka maraan oo ay eegaan iney u baahanyihiin BCG.

Sida qaalibka ah, gaar ahaan ayaad u samaysaneysaa BCGga safarka iyo baadhisteeda. Qaar ka mid ah dhakhtarada safarka qaabilsan ayaa adeegan fuliya laakiin qiimahooda ayaa kala duwan waxaana fiican inaad qiimaha telifoon ku sii ogaatid. Dhakhtarka safarka ee MASTA ayaa UK oo dhan ku yaala, inkastoo kuligood aanay bixin BCG. Dhakhtarka kuugu dhow waxaad ka heleysaa websaytkooda www.masta.org.

Haddaad Lodon ku nooshahay, waxa kaloo bixiya BCG dhakhtarka la yidhaahdo Medicentre ayoo ku yaala maxadadaha tareenka badan kooda cinwaankooda websaytku waa www.medicentre.co.uk ama telifoonka ka wac 0870 600 0870. Hadday kugu adkaato inaad heshid dhakhtar wac hagaha BT si aad uga heshid warbixin dheeraad ah.

## Waa maxay qaaxadu (TB)?

TBdu waa xanuun baakteeriyo keentoo badanaa ku dhaca sanbabada kuna dhici kara jidhka intiisa kale. TBda daawo xidhiidh loo qaato ayaa lagu daweyn karaa oo badanaa ku eg 6 bilood. TBda sanbabada iyo cunaha oo kaliya ayaa cudur fidiye ah, dadka badankiisa kuma fido haday dawadaa ku qaataan laba wiig gudahood.

## Sidee baa TBda loo qaadaa?

Marka uu qufaco ama uu hindhiso qof qaba qaaxadu wuxuu hawada ku siidaayaa jeermis kaas ayuu daka kalana neefsdaan oo qaataan. Dadka badanaa qaadaa waa kuwa in badan la jooga kuwa qaaxada qaba (badanaa kuwa is qaba iyo kuwa guriga kula nool ama sida naadirka ah jaalihiisa shaqada). Uma eka in qof qaaxo ka qaado meelaha ka midka yihiin basaska ama tareenada, mar hadday daruuri tahay si loo kala qaado xaanuunka in qof kale oo qaba dhawr saacadood laysu dhawaado, TBdu kuma fiddo candhuuf la tufo iyo shay la wadaago.

UK gudaheeda dadka badanaa khatarta u ah iney fidiyaan qaaxada waa kuwan:

- inay muddo dheer isku dhawaayeen qof cudurka qaba
- ku noolaa meel TBda weli caan ku ah
- nadaamka talaalka uu laciifiyey HIV ama xaalado dawo oo kale
- xaalad xun oo caafimaadka saameysa arrimaha bulshada sida guri-la'aan, sakhrad, daroogo khalad loo isticmaalo

Caruurta yaryar iyo dadka waaweyn ayaa aad ugaga dhow dadka kale iney qaadaan jeermiska TBda.

Faraq weyn baa u dhexeeya infekshanka iyo jeermiska firfircoon, dadka infekshanka wuu ku dhici kara laakiin uma bukoonayaan (taas waxa la yidhaahdaa infekshanka Tbda qarsoon), nadaamka tallaalka ayaa dadka badankiisa uga dhiga baakteeryada inaanay noqon mid firifircoon. TBda firfircoon oo kaliya ayaa suurtoobi karta iney ku fiddo dadka kale

## Markaan yaraa maan qaadan tallaalka BCG – iminka ma qaadan karaa waatan TBdu ku badatay UKe?

Intii ka horreysey 2005tii markuu istaagay borigaraamkii BCG ee iskuuladu, inta badan iskuulka ayaa nalagaga mudi jiray BCG markaanu ahayn da,aha 13 jirka. Haddii aan lagu tallaalin (lama tallaalin ilaayo 30% naga mid ah) runtii in la qaato iminka looma baahna, da'ahaas 15 jirka ayuunbuu BCGgu waxtar u yahay baadhis la sameeyey waxay sheegeysaa mar labaad haddii la qaato iney saameyn yar leedahay oo ay saamayn yar u leedahay kuwa ka wayn 35 jir. Dadka badankiisa weli way yartahay khatarta ay TBda ku qaadaan sida ugu fiican ee laysaga ilaaliyaana waa iyadoo layska daweeyo oo la joojiyo fidista TBda.

## Sidee loo sameeyaa tallaalka BCG?

Marka hore waxa la qaadaa baadhista jidhka si loo ogaado habka falgalka tallaalka ee baakteeriyada qaaxada. Sida qaalibka ah caruurta 6 sano ka yari uma baahna baadhitaan ka horeeya tallaalka, oo aan ahayn iyagoo xidhiidh dhaw la leh qof qaba qaaxo ama ay ku noolaadeen in ka badan saddex bilood wadan kale oo kiisaska TBdu ku badanyihiin. Baadhista jidhka waxa la yidhaahdaa Mantoux waana mudis yar oo maqaarka sare ee jidhka lagu sameeyo. Way ku kaari lakiin badanaa xanuun muddo ah ma laha. Waxa jirta laba nooc oo baadhista dhiiga ah iyo dhawr badhisood oo kale.

Baadhista jidhka marka la sameeyo, waxa loo baahanyahay inaad ku soo noqoto maalmo ka dib natiijada, oo hadday noqoto maya si laguu siiyo saddex bilood ka dib tallaalka BCG. Tallaalka waxa lagaaga mudayaa gacanta halkeeda sare, marka waxa sii muuqandoonta bar yar oo ku baaba'aysa 4-6 saacadood.

## Maxaa dhacaya tallaalka BCGga ka dib?

Meeshaas lagaa tallaalay maalmo wey ku xanuuni laakiin marxaladdaas wax fiican lagama arko. Badanaa uma keento qofka jiro ama xanuun.

Laba wig ka bacdi waxa meesha ka soo baxaya kuus yar. Wuxuu noqon karaa marka danbe nabar dheecaan leh, Fadlan ha tuujin udaa hawada ayaa cawineysa inuu bugsado. Ha isku deyin inaad ka qadid hadey qolafi fuusho. Badanaa waxa lagu ilaaliyaa maro qalalan. Maydhashada iyo dabaasha waa la samayn karaa laakiin markaad qalajineysid dhawr. Waxay qaadaneysaa 8 wiig iney ku bugsato halkaa lagaa tallaalay.

Calaamad yar oo goobo ah ayaa ku hadheysa halka sare ee gacanta. Ugu dhawaan waxay ku qaadataa BCGga lix wiig inuu talaalka TBdu ku hirgalo.

Marka la qaato BCG, 3 bilood isla gacantii tallaal kale lagama qaadan karo. BCG isku mar waa lala qaadan karaa tallaada kale ee nool (talaalada nool waxa ka mid ah BCG, jadeeco, qaamo-qashiir, MMR iyo rubella). Markaa, haddii aan markiiba la wada qaadan, waa iney u kala dhexaysaa 4 wiig sida lagu taliyey.

## Waa in dhaktarkaaga ama kalkaaliyuhu ogaadaa arrimaha hoos ku qoran ka hor baadhista jidhka iyo BCG.

- inuu haa yahay HIV
- Jeermis khatar ah
- TB hadda ah ama xili hore
- Dawo jidhka wada geleysa
- In hore looga helay TB badhista jidhka
- Talaalada nool inuu 4 wiig ee u danbeeyey
- Talaal hore oo ah BCG
- uur leeday ama irmaantay
- Xumad badani jirto
- Qanja xanuun ama ifagshan kale
- Bukaan guud oo jidhka ah

Waa muhiim inaad u haysatid talaalka BCG tixraaca daweyntaada mustaqbalka.

**TB Alert** waa hay'adda kaliya ee samafal kuna taal UK ee kor u qaada ogaalka qaaxada aduunweynaha.

Waanu taageernaa mashaariicda hubinaya iney dadka buka ee wadamada soo korayaa heleen daaweyn iyo wacyigelin saxa. Hadaad na taageerto saamayn la taaban karo ayaanu u geysaneynaa TBda aduun weynaha dad badana wuu badbaadi.

**TB Alert**
Community Base,
113 Queens Road,
Brighton BN1 3XG
Tel: 01273 234030

Wixii warbixin dheeraada ah iyo nuqulka warqaddan, fadlan kala xiriir 01273 234 770 (xiliga shaqada oo kaliya).

Sii aad deeq ama iska-wax-u-qabso u tartid TB Alert,fadlan kala xiriirt 01273 234 784 (xiliga shaqada oo kaliya).

Ama gal websaytkayaga www.tbalert.org

**Astaamaha caamka ah ee TB waxa ka mida:**

- **qufac joogto noqda in ka badan 3 wiig, dawada caadiga ahi waxba aanay ka qaadin siina xumaada**
- **xumad ( Kuleyl badan)**
- **dhidid habeenkii ah oo badan oo kalifta in gogosha la bedelo**
- **miisaanka oo sabab la'aan u luma**
- **daal (awood darro iyo daal badan)**
- **qanjidhada oo barara**
- **dhiig la qufaco (tani aad uma dhacdo laakiin daweyn degdega ayey u baahantahay)**

Astaamahani hadana waxay noqon karaan calaamado mushkalado kele ah, lakiin hadaad hesho saddex ama ka badan oo aad werwertid u tag dhatarka xaafaddiina.

Stop Tuberculosis Worldwide

# Qaaxada (TB) Iyo tallaalka BCG